

Jadeeccada, macluumaadka bukaan socodka

Waa maxay sababta aan u helay macluumaadkan?

Baaritaankii ayaa muujiyey inaad qabtid jadeecco. Xogtu waxay sidoo kale ku wajahan tahay adigaaga laga baaray jadeeccada ee sugaya natijadabaaritaanka.

Waa maxay jadeeccadu?

Jadeeccadu waa cudur fayras ah oo aad loo kala qaado. Cudurku wuxuu keenaa qandho iyo finan, inta badan waxaa weheliya diif/duuf, qufac ama indho casaan. Xanuunku wuxuu caadi ahaan qofka kaga tagaa qiyaastii 10 maalmood gudahood

Jadeeccadu waxay sababi kartaa dhibaatooyin kale sida caabuqa dhegaha, caabuqa sambabada iyo shuban. Xaaladaha aan caadi ahayn, wuxuu cudurku keeni karaa barar maskaxda ah oo keeni kara dhibaatooyin xagga dheelitirka iyo wareer. Haddii ay kugu dhacaan dhibaatooyinkani, waa inaad la xiriirtaa daryeelka caafimaadka.

Ma jirto daawo jadeeccada lagu daawayn karaa. Daawenta waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo astaamaha cudurka.

Sidee loo kala qaadaa jadeeccada?

Jadeeccada aad ayaa laysu qaadsiiyaa. Fayrasku wuxuu la socdaa hawada neefsashada waxaana lagu kala qaadaa hawada. Waxaa ku filan oo keliya inaad isku qol ku jirtaan si aad qof kale u qaadsiiso. Fayrasku waxa kale oo lagu kala qaadaa qufaca iyo hindhisoooyinka.

Iswiidhan dadka inta badan waa laga tallaalyay cudurka jadeeccada. Qofkasta oo qaataay laba qiyaasood oo ah tallaalka jadeeccada wuxuu leeyahay difaac wanaagsan, khatarta uu jadeecada ku qaadi karaana aad ayey u yar tahay. Si kastaba ha ahaatee, tusaale ahaan. carruurta da'doodu ka yar tahay 18 bilood ee aan gaarin wakhti ay ku qaataan tallaalka ugu horreysa ee jadeeccada way u nugul yihiin in lagu daarto cudurka. Sidoo kale waxay khuseysaa dadka waaweyn ee aan laga tallaalin jadeeccada ee aan sidoo kale hore u qaadin cudurka.

Ilaa intee ayaan anigu cudurka dadka kale qaadsiin karaa?

Waxaad cudurka gudbin kartaa afar maalmood ka hor ilaa afar maalmood ka dib markay finanku kugu bilaabmaan. Waxaad ka bogsanaysaa cudurka caabuqa shan maalmood ka dib markay finanku kugu bilaabmaan.

Maxaan ka fikiraa si aanan dadka kale u qaadsiin?

Ilaa inta aad cudurka wax qaadsiinayso, waxaa haboon in

- aanad la kulmin dad kale oo ka baxsan dadka gurigaaga, tusaale ahaan ha aadin shaqada, dugsiga ama hawlaho wakhtiga firaaqada
- ha raacin gaadiidka dadweynaha
- haddii ay dhacdo inaad booqato daryeelka caafimaadka la sii xiriir inta aanad booqan ka hor oo u sheeg inaad qabto cudurka jadeeccada.


Raad raaca caabuqa

Sida uu dhigayo sharciga ilaalinta caabuqyadu, waa khasab inaad ka qaybqaadato raad raaca caabuqa. Taas macnaheedu waxaa weeye inaad siiso macluumaad shaqaalaha daryeelka caafimaadka si ay u soo baaraan goorta, meesha iyo sida aad u qaadday iyo in laga yaabo inaad dadka kale qaadsiisay.

Waxa aad sheegto waa sir (qarsoodi) dadka aad sheegi doontaana ma ogaan doonaan qofka aad tahay.

Macluumaad dheeraad ah

[Mässling | 1177 \(1177.se\)](https://Mässling | 1177 (1177.se))



Tallaalka oo sii socda

Xitaa haddii tallaalka jadeeccada laga helayo difaac nolosha oo dhan ah, waxaa haboon inay carruurta jadeeccada qaadday ay sii wataan oo ay qaataan tallaalka jadeecada (MPR) sida uu dhigayo barnaamijka tallaalka carruurtu. Waa muhiim sababtoo ah tallaalka jadeeccadu (MPR) wuxuu kale oo ka horteggayaa qaamo-qashiirta, cudur daamanka barariya iyo cudur kale oo finan yar yar leh (röda hund).

Warqad ku saabsan ilaalinta cudurrada faafa

Warqadda ilaalinta cudurrada faafa waxaa soo saaray Ururka caafimaadka ilaalinta cudurrada faafa waxayna khuseeysa heer qaran.